JAMHUURIYADA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

Xafiiska Af-hayeenka Madaxtooyada JSL,

E-mail: afhayeenka_jsl@yahoo.com, afhayeenka@hotmail.com

*Taariikhda: -* 14/04/2015

# WAR-SAXAAFADEED

Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, Mudane. Axmed Maxamed Silaanyo waxa uu digreeto madaxweyne oo summadiisu tahay JSL/M/XERM/249-3178/042015 uu dalka kaga Joojiyey Isticmaalka Bacaha iyo Fayo-dhawrka Deegaanka.

Madaxweynuhu:-

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobbada 90aad iyo 18aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Qodobada 68aad iyo 75aad ee Xeerka Ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka ee Xeer Lr.23/2007; |
| Markuu Arkay: | Soo jeedinta Guddida Heer Qaran ee Bilicda Magaalooyinka; |
| Markuu Tixgeliyey: | Xilka iyo Mas'uuliyadda Dawladda ka saaran ilaalinta fayo-dhawrka deegaanka, bilicda iyo nadaafadda guud ee Magaalooyinka Somaliland; |
| Markuu Garawsaday: | In jaangooynta kormeerka iyo wax-ka-qabadka bulaacadaha, Musqulaha iyo goobaha qashin qubka iyo nadaafadda Goobaha Ganacsiga sida Sariibadaha iyo Goobaha Cuntada ay aas-aas u tahay kor u qaadida iyo ilaalinta fayo-dhawrka; |
| Markuu Arkay: | Dhibaatada ay Bacdu ku hayso Dhirta, Xoolaha, caafimaadka guud ee Bulshada iyo Bilicda Magaalooyinka Somaliland; |

## Wuxuu Go'aamiyey:

1. In ay reebban tahay soo dejinta iyo ka-ganacsiga noocyada Bacda ee kala duwan sida Bac-miikada, Bacda ila-qabada, bacaha Shirkadaha iyo Dukaamada ee Xayaysiiska Ganacsiga.

2. In Dawladaha Hoose iyaga oo fulinayo Xeerka Ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka ay ku ilaaliyaan, kuna kormeeraan Goobaha Ganacsiga iyo Warshadaha in Bacaha u yaalla ay ku dhammeeyaan muddo 120 maalmood, muddadaa wixii ka danbeeyana ay ku dedaalaan wixii beddeli lahaa Bacaha.

3. In Wasaaradaha ku Shaqada lehi iyaga oo u maraya Maamulka Gobollada ku kormeeraan Dawladaha Hoose ilaalinta iyo kor u qaadida heerka fayo-dhawrka Deegaanka iyo Caafimaadka Bulshada.

4. In la joogteeyo Wacyigelinta Dadweynaha ee faya-dhawrka deegaanka.

## ALLAA MAHAD LEH

Naasir Yuusuf Daahir
Xoghayaha gaarka ah ee Xafiiska Saxaafada Madaxtooyada JSL.